

SUGNAANSHIYAH HELITAANKA CUNTADU, WAA SEESKA KARAAMADA QOFKA





09



ADEEGYADA IYO
HAWLAHA SAMAFAL
EE CAAFIMAADKA

06



MASHAARIICDA
BIYAH A IYO
FAYADHOWRKA

07



MASHAARIICDA
DHISMAHA

10



MASHAARIICDA
XOOGSI XALAAL AH

12



AQOON & OGAAL

14



HAWLAHA
WAXBARASHADA



Address: Barbera Road - Hargeisa
Mobile: +252633278253
Phone: +252514333
E-Mail: somalia.office1@gmail.com
Website: www.arcosom.org

مساراًت
خيريَّة CHARITABLE PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO
HAYADDA GARGAARKA AFRICA
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED
IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (36) AUG 2024





AGAASIMAH A GUUD EE WASAARADDA AWQAAFTA IYO ARRIMAHADIIINTA OO BOOQASHO KU YIMI XARUNTA KUWEYTIGA



Agaasimaha guud ee wasaaradda awqaafta iyo arrimaha diinta mudane Khaalid Ibraahim Xasan, aaya kormeer ku yimi xarunta waxbarashada ee Kuweytiga iyo hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) magaalada Hargeysa.

Agaasimaha oo uu wehelinyey lataliyaha wasaaradda ee arrimaha dawladaha iyo hay'adaha Carabta, mudane Khaalid Maxamed Ayjeex, waxa uu kormeer ku soo maray qaybaha xarunta Kuweytiga. Waxa aanu qayb kasta masuuliyiinteeda ka dhegeystay xogo ku saabsan, hawlahay ay hayso iyo hannaanka ay u shaqayso.

Sida oo kale agaasimuhu waxa uu kulan isbarasho iyo xog-oogaal noqosho ah la qaata Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi, maamulaha guud ee hay'adda Gargaarka

Afrika (ARC). Kaas oo agaasimaha uga warramay mashaariicda la xidhiidha wasaaradda Awqaafta ee ay hay'addu ka waddo Somaliland.

Dr. Mucallimi waa uu agaasimaha uga mahadnaqay booqashadan kormeerka uu ku yimid xarunta Kuweytiga, isaga oo dhinaca kalana bogaadiyey kaalinta mugga leh ee ay wasaaraddu ku leedahay fududaynta iyo iskaashiga hawlahay hay'adda.

Hay'adda ARC oo klaashanaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waxa ay Somaliland ka fulisaa mashaariic tiro badan. Wasaaradda awqaafta iyo arrimaha diintuna waxa ay ka mid tahay, hay'adaha dawladda ee ay wada shaqaynta dhow leeyihiin.





ARC OO SHAHAADO SHARAF KU MUTAYSATAY HAWLAHA SAMAFALKA



Wasaaradda Awqaafta iyo arrimahad diinta ee Somaliland ayaa shahaado sharaf ku maamuustay hay'adda Gargaarka Afrika (ARC), kaalinta ay ka qaadato kobcinta waxbarashada iyo xiftiga Qur'aanka Kariimka ah, iyo guud ahaan hawlahaa bani'aadamnimo ee Somaliland ay ka hayso.

Wasiirka wasaaradda Sheekh Maxamed X. Aadan oo shahaadada guddoonsiyyey maamulaha guud ee ARC, Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi, ayaa hadal kooban oo uu goobtaas ka jeediyeey, waxa uu bogaadiyey doorka muuqda ee

ay ARC ku leedahay dhiirrigelinta xiftiga Qur'aanka iyo Barashada diinta, iyada oo sannad kasta tobannaan Masaajid iyo xarumo lagu barto diinta ka hirgelisay goballada kala duwan ee dalka.

Dr. Almucallimi oo isaguna ereyo kooban ka jeediyeey munaasabadda, ayaa wasiirka iyo guud ahaan masuuliyiinta kala duwan ee wasaaradda uga mahadnaqay, iskaashiga xooggan iyo hawl fududaynta joogtada ah ee ay ku siiyaan fulinta hawlahooda. Taas oo uu sheegay in la'aanteed aanay wax badani si fudud ugu hirgeli lahayn hay'adda.





CISBITAALKA ‘HARGEISA INTERNATIONAL’ OO MAAMUUSAY HORMUUDKA SHAQAALAHAA



Maamulka cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa (Hargeisa International Hospital – HIH) ayaa maamusay 35 ka mid ah hawladeennada qaybaha kala duwan ee cisbitaalka oo loo aqoonsaday in lixdii bilood hore sannadka 2024 ka, ay hormuudka ka ahaayeen shaqo wanaagga iyo habmacaamilka fiican ee shaqada.

Munaasabadiweynloosooagaasimayayaa hawladeennadan lagu guddoonsiiyey, shahaado sharafyo iyo hadyado ka turjumaya kaalinta wax-ku-oolka ah ee ay lixdii bilood ee u dampaysay kaga jireen hawlaha cisbitaalka. Isla markaana ah aqoonsi uu maamulka cisbitaalku ku qirayo kartida, shaqo wanaagga iyo xirfadda sare ee ay ku guteen adeegyadii caafimaad ee cisbitaalku u qabanayey bukaanka.

Dr. Axmed Muctamad, maamulaha

cisbitaalka HIH oo munaasabadda ka hadlay ayaa bogaadiyey, dadaalka nafhurka ah ee ay hawladeennada caafimaadka ee cisbitaalku geliyan u adeegista bukaanka. Wuxuu sheegay in maamulka cisbitaalku ay ku faanayaan, in ay hawladeennadani ka tirsan yihiin shaqaalaha cisbitaalka. Isaga oo dhinaca kalana amaanay shaqada midha dhalka ah ee ay guud ahaanba shaqaalaha cisbitaalku muujiyeen muddadaas lixda bilood ah.

Dr. Muctamad waxa uu sheegay in abaalmarintani ay ka turjumayo qaddarinta iyo maamuuska uu maamulka cisbitaalku u hayo hawladeennadiisa, iyo dadaalka lagu doonayo in shaqaalaha oo dhan lagu dhiirrigeliyo in ay sii wanaajiyaa shaqadooda.



MASHAARIICDA BIYAH IYO FAYADHOWRKA



ARC AYAA HIRGELISAY CEELAL CUSUB

Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa mar kale hirgelisay qodaalka saddex ceelbiyood oo ku yaalla deegaanno kala duwan. Ceelashan oo dabooli kara baahida biyood ee ugu yaraan 1050 ruux, laba ka mid ahi waxa ay ku yaallaan deegaanka magaalada Baladweyne ee dawladgobaleedka Hirshabeelle, Soomaaliya, halka midka kale uu ku yaallo deegaanka Qorraxley ee gobalka Maroodijeex, Somaliland.

Sannad kasta tobannaan ceel biyood oo jooggoodu kala duwan yahay ayaa ay

ARC ka fulisaa deegaannada oomanaha ah ee gobalka Geeska Afrika, waxaana ka faa'idaysta kumannaan ka mid ah qoysaska danyarta ee aan gaadhi karin deegaannada loo arooro, ama aan haysan kharashka badan ee biyaha lagu iibsado deegaannadaas.

Barnaamijka biyaha iyo deegaanka ee ARC ay deegaannada Soomaalida ka fuliso, waxaa maalgeliya hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA iyo dad samafalayaal ah oo isla hay'addaas soo mariya.





ARC OO DAYACTIR IYO QALABAYN U SAMAYSAY XARUN QUR'AANKA LAGU BARTO

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa dayactir iyo dib u qalabayn ku samaysay, xarunta xiftiga Qur'aanka Kariimka ah ee Sahra oo ku taalla degmada Macallin Haaruun ee magaalada Hargeysa.

Saddex fasal oo ay xaruntani ka koobantahay ayaa lagu sameeyey dayactir dhinaca dhismaha ah, iyo qalabayn ay ka mid yihii marawaxado, iyo gogol. Sida oo kale waxa dayactir iyo horumarin lagu sameeyey nidaamka biyaha, iyada oo loogu kordhiyey taangi biyaha lagu kaydiyo oo qaadaya kun litir, iyo sida oo kale kitaabbada qur'aanka iyo qalabka waxbarashada iyo agab uu

ka mid yahay rixliga kitaabka la saaraa. Xarunta Barashada Qur'aanka ee Sahra waxaa ka faa'idaysan kara halkii xilli 100 arday.

ARC waxa ay sannad kasta maalgelisaa mashaariic dhismayaal cusub ama dayactir iyo qalabayn loogu samaynayo xarumaha Barashada Qur'aanka Kariimka ah, iyo waxbarashada aasaasiga ah. Kuwaas oo ay ka faa'idaystaan boqollaal ka mid ah ardayda Soomaaliyeed ee ku dhaqan deegaannada kala duwan ee gobalka Geeska Afrika.



ARC OO MASAAJID CUSUB KA DHISTAY MAGAALADA GOBALKA AWDAL

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa masaajid cusub ka dhistay magaalada Aw Barre ee Gobalka Awdal, masaajidkan oo halkii mar ay ku tukaan karaan 116 ruux, waxaa loo dhammaystiray kaabayaasha lagama maarmaanka ah ee ay ka mid yihiiin, gogosha iyo qalabka cod baahinta oo dhammaystiran.

ARC sannad kasta waxa ay Geeska Afria ka hirgelisaa tobannaan Masaajid iyo dugsiga Qur'aanka Kariimka ah iyo culuumta aasaasiga ah lagu barto. Kuwaas oo qayb ka ah Barnaamijyada arrimaha bulshada iyo waxbarashada ee ay hay'addu ka waddo gobalka, iyada oo gacan ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.



SUGNAANSHIYAH HELITAANKA CUNTADU, WAA SEESKA KARAAMADA QOFKA

Gobalka Geeska Afrika oo la daalaa dhacayaa masiibooyin kala duwan, helitaanka quutaldaruurigu waxa ay mudnaanta koowaad u tahay, malaayiin dad ah oo ay caqabado ka haystaan helitaanka baahiyaha cunto ee aasaasiga ah. Sida ay qaramada midoobey qiyaasayso Soomaaliya oo keliya 6 Milyan oo ruux ayaa ay hubanti la'aani ka haysataa helitaanka cuntada; waxaa ka mid ah 1.7 Milyan oo carruura ah oo qarka u saaran nafaqadarro.

Abaaraha soo noqnoqda, colaadaha tobannaanka sano soo jiitamayey, raadadka taban ee ka dhashay isbeddelka cimilada, gaadhitaanka ama helista khayraadka dabiiciga ah oo xaddidan, iyo dhibaatooyinka dhaqaale oo naafeeyey noloshii bulshada ayaa uga sii dara xaaladdan marka horeba adkayd ee gobalka baraysatay. Waa aanay saamayn taban oo aan qiyaas lahayn ku yeelatay dadka nugul; Dhallaanka, haweenka iyo dadka waayeelka ah.

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC), iyada oo gacan ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt iyo deeqbixiyeyaal kale oo caalamiya, waxa ay hormuud ka tahay dadaallada cunto gaadhsiinta bulshada ku dhaqan deegaannada ay ka shaqayso ee Soomaalida Geeska Afrika. Waa ay fulisaa ololayaal iyo mashaariic, ay dadka saboolka ah ee deegaannadan gaadhsiinayso cuntooyin kala duwan. Sida oo kale waxa ay hirgelisaa mashaariic wacyigelin, maalgelin iyo kobcin ah oo ay ka faa'idaystaan qoysaska ku nool duruufaha dhaqaale ee adagi.

Si kastaba ha ahaato ee, in xal buuxa loo helo dhibaatada ah hubaanti la'aanto cunto ee ka jira gobalku, waxa ay u baahan tahay iskaashi ballaadhan oo ay daneeyeyaasha kala duwani ka yeeshaan dadaalladooda xal u helidda dhibaatadan. Waxaa ka mid ah dhiirrigelinta beeraha, kordhinta helitaanka iyo gaadhitaanka biyaha nadiifta ah, xoolaynta qoysaska abaaraha iyo colaadaha ku caydhooba, waxbarashada ubadka, tababarka xirfadaha iyo waxbarashada farsamada gacanta ee dhalinyarada si ay suuqa shaqada u buuxiyaan, maalgelinta xirfadlayaasha iyo ganacsiyada yaryar, dhiirrigelinta beer-falashada, iyo in la quudiyo qoysaska danyarta ah, arrimahaas oo dhammaantood ay hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) siyaabo kala duwan gacan uga geysato wax ka qabashadooda.

ARC, dhammaan hay'adaha caalamiga ah, kuwa carabta iyo kuwa gobalka ka shaqeeya waxa ay ugu baaqaysaa, in la kordhiyo, la isuna kaashado dadaallada xalka loogu raadinayo cunto yaraanta, korna loogu qaado hindiseyaasha lagu badbaadinayo nolosha dadka saboolka ah, si loo qurxiyo mustaqbalka bulshada Soomaaliyeed ee gobalkan ku dhaqan.

Cunto yaraanta ka jirta gobalku waa imtixaan lagu tijaabinayo dareenka aadamenimo ee dunida, iyo u hagar baxa awoodaha aynnu u leenahay in aynnu wax ka qabanno baahida cunto ee haysata malaayiinta qof ee gobalka ku nool. Baaqayaguna waa in la isu kaashado dagaalka ka dhanka ah saboolnimada, iyo yaraynta gaajada ee gobalka.

MASHAARIICDA ARRIMAHAD BULSHADA**ARC Oo Deeq Xoola Ah Gaadhsiiisay Qoysas
Xoolihi Ka Baxeen Gobalka**

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa xoolaysay qoysas ku dhaqan deegaannada kala duwan ee Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika. Barnaamijka 'Xoogsi xalaal ah' ee ARC ayaa xoolahan gaadhsiiisay qoysaskan oo ku dhaqan magaaloooyinka Jigjiga ee dawlad-deegaanka, iyo caasimadda Hargeysa, Burco iyo Laascaanood.

Xoolahan oo loogu talagalay in qoysaskan danyarta ahi ay ka faa'idaystaan caanahooda, subaggooda iyo tarantooda, waxaa qoys kasta la guuttooniisay saddex

neef oo dhaqasho irmaan ah.

Barnaamijka Xoogsi xalaal ah oo sannad kasta ay ka faa'idaystaan boqollaal Soomaaliyeed oo ku dhaqan deegannada gobalka Geeska Afrika, waxa uu yoolkiisu yahay in qoysaska danyarta ah iyo dhalinyarada looga caawiyo in ay helaan ilo dakhli. Taas oo ah qorshe la doonayo in lagu xoojiyo isku filnaanshiyaha iyo horumarka waara, lagulana dagaalamo saboolnimada.



ARC Oo Maalgelisay Qaar Ka Mid Ah Haweenka Gobalka



ARC ayaa ganacsiyo yaryar u furtay haween kala duwan oo ku nool magaaloooyinka Jigjiga, Hargeysa, Muqdisho, Burco iyo Laascaanood. Miiska khudradda, kabadhka wareega (Taayirrada leh) ee cuntada lagu iibiyio iyo badeecadiihii bilowga ganacsiga raasamaal u noqon lahaa ayaa ARC ay ugu deeqday haweenkan oo ay ku tiirsan yihiin qoysaskoodu.

Afar meheradood oo nooca khudradda ee booshariga loo yaqaanno ah ayaa loo furay haween ku dhaqan magaaloooyinka Jigjiga ee dawladdeegaanka, Hargeysa iyo Burco ee Somaliland iyo Muqdisho, Soomaaliya. Meheradahan ayaa isugu jiray Miiska marfashka khudradda iyo khudraddii raasamaalka u noqonaysay bilowga meheradda. Magaalada Muqdishana laba qoys ayaa loo maalgelisay meherad kuwa dharka lagu iibiyio ah oo ka kooban miiskii lagu dul iibinayey iyo dharkii bilowga Koowaad raasamaalka u noqonayey.

Halka magaalada Laascaanoodna hal qoys loo maalgeliyey meherad nooca lagu dul iibiyio cuntada fudud ah, taas oo ka kooban kabadhka guurguura (Taayirrada leh) iyo badeecaddii bilowga ganacsiga u noqonaysay.

Mashruucan oo qayb ka ah Barnaamijka Xoogsi xalaal ah, waxa uu dadka hal-abuurka leh u furaa ilo ay dakhli ka soo saari karaan, si u dabbaraan nolosha qoysaskooda. Waa qayb ka mid ah Barnaamijka ballaadhan ee Xoogsi xalaal ah, kaas oo sannad kasta fuliya mashaariic isugu jirta maalgelin ganacsiyo yaryar, xoolayn, iyo ku tababarista xirfadaha iyo farsamada gacanta, waxaa loogu talagalay in dhalinyarada lagu caawiyo in ay iyagu nolosha qoysaskooda dabbaraan. Ujeeddada barnaamijkani waxa ay waafaqsantahay yoolka qaramada midoobey ee ‘Horumaka Waara’, kaas oo lagula dagaalamayo saboolnimada.



AQOON & OGAAL



ALRAXMA Oo Tababar Siisay Macallimiin iyo Masuuliyiin Waxbarasho



Maamulka iyo macallimiinta xarumaha waxbarashada iyo dugsiyada ay maamusho hay'adda ARC ayaa ka qaybgalay tababar ay soo qabanqaabisay waaxda waxbarashada, hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt. Tababarkan oo socday laba maalmood, waxa uu ahaa tababarkii Koowaad ee sannadkan 2024 ka.

Tababarkan oo cinwaankiisu ahaa 'Barbaarinta ka hortagga ah, iyo kaalinta ay ku leedahay ka hortagga anshax xumada ardayga' waxa uu macallinka ku carbinayey habka uu ardayga ugu jeexi karo dariiqa saxda ah ee ay tahay in uu maro, iyo tabaha muhiimka ah ee uu kaga hortegi karo in ay beddelaan dhaqannada leexsan iyo anshax darrada uu cid kale ka arkaya.

ARC oo kaashanaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ayaa sannad kasta dhowr tababar oo kala duwan u qabata macallimiinta, maamulka iyo hawladeennada kala duwan ee waxbarashada. taas oo ay ujeeddadiisu tahay in kor loo qaado waxsoosaarka waaxda waxbarashada, aqoon ahaan iyo anshax ahaan labadaba.



Tababarka doorkan waxaa ka soo qaybgalay mudan isugu jira aqoonyahan, iyo xeeldheereyaal dhinaca barbaarinta ah. waxaa ka mid ahaa Dr. Khaalid Saamuli, Dr. Salaax Jalaal, iyo Dr. Yaasir Candallah Sharaf. Waa aanay bixiyeen casharro kala duwan oo la xidhiidhay mawduucan iyo sida oo kale habka ugu fiican ee uu macallinku ardayga ugu samayn karo barbaarin fiican. Waa kale oo macallimiinta la baray istaraatijiyadaha barbaarinta fiican ee ay ku dhaqmaan hay'adaha iyo xarumaha waxbarashadu, iyo kaalinta ay ku yeelan karaan yaraynta dhaqan doorsoonka iyo leexashada anshaxa ardayga.

Ka qaybgalayaasha ayaad u soo dhoweyey tababarkan oo ay qireen muhiimadda casharrada ay qaateen ay u leeyihii barbaarinta, iyo guud ahaan shaqada waxbarashada ee ay gacantak u hayaan. Waa aanay ballanqaadeen in wixii ay barteen uu ka muuqan doono macalinnimadooda mustaqbalka.

دُرْقَة

يشرف القطاع التعليمي بدعوتكم للمشاركة في فعاليات
الدورة الأولى التدريسي الأول (عجمان) 2024

بعنوان:

**الدورة الافتتاحية ودورها في مواجهة
التحديات السلوكية لدى الطلاب**

د. ياسر العلوي
الأمين العام للجنة
الإغاثة والتأهيل

د. خالد سالمي
رئيس مجلس إدارة
الجنة الإغاثية

د. سلامة جلال
رئيس مجلس إدارة
الجنة الإغاثية

Bahda Waxbarashada ARC Oo La Siisay Tababar Lagu Xoojinayo Aqoontooda



Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa tababar u qabatay, macalimiinta iyo kormeerayaasha xarumaha iyo dugsiyada waxbarashada ee hoos yimaadda. Tababarkan oo socday muddo saddex maalmood ah, waxaa ka qaybgalay 50 xubnood oo ka mid ah macalimiinta iyo kormeerayaasha dugsiyada xarumaha kala duwan ee ay ARC gacanta ku hayso, waxa kale oo ka mid ahaa 10 xubnood oo ka socday dugsiyada kale ee ka madaxa bannaan hay'adda ARC ee magaalada Hargeysa.

Tababarayaasha kala ahaa Xamse Xabiib, Kamaal Marjaan, Caadil Qandiil, Xasan Muuse, iyo Rajab Ismaaciil ayaa tababartayaasha siiyey casharro kala duwan oo ay ka mid yihii; Maaraynta iyo qorshaynta casharka, diyaarinta casharrada iyo gudbinta manhajka waxbarashada, maamulka fasalka, iyo khatarta wararka ku tiri-u-teenta ahi ku yihii maamulka iyo nidaamka, sababaha keeni kara iyo ka hortaggooda. Waxaa intaas dheeraa doodo ka qaybgalayaashu ka qaybqaateen



Tilmaamaha lagu aqoonsan karo kormeeraha waxbarasho ee guulaysta.

Marka laga tago waxbarashada iyo aqoonta guud, waxa kale oo tababarkani lahaa ujeeddooyin ay ka mid tahay in hawladeennada kala duwan ee waxbarashadu ay helaan fursado isbarasho iyo is dhixgal, iyo in ay waayoaragnimada iyo aragtiyaha is dhaafsadaan, faham fiicanna ka qaataan farriinta iyo istaraatijiyadaha waxbarashada ee hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo maalgelisa Barnaamijka waxbarashada Kuweytiga ee eay maamusho hay'adda ARC.

Gebgebadii tababarkan oo lagu qabtay xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa, waxa ay ka qaybgalayaashu bogaadiyeen aqoon-korodhsiga ay ka heleen tababarka iyo fursadda loo siiyey in ay kor u qaadaan xirfaddoda macalinnimo.



WAXBARASHADA



Kuweytiga Oo Furay Dugsi Casri Ah Oo Ku Baxaya Afafka Ingiriisi Iyo Carabi



Xarunta waxbarashada Kuweytiga ee magaalada Hargeysa ayaa furtay dugsi casri ah oo uu manhajkiisu ku baxayo Afka Ingiriisida, sida oo kalana si tayadeedu sarrayso loogu baranayo afka Carabida. Dugsigan oo lagu furay waxbarashada bilowga ah, marka laga tago manhajka qaybta Afka Ingiriisida ku baxaysa, waxa kale oo uu ardayda barayaa maaddooyin la xidhiidha culuumta bulshada, shareecada islaamka iyo barbaarininta wanaagsan.

Macallimiin tayo iyo aqoon lagu soo xulay

afkooduna Ingiriisi iyo Carabi yahay ayaa ardayda wax bari doona, waxaana lagu bilaabay ardayda xilliga barbaarininta ee dugsiga ka hor, si tayada loo ilaaliyana waxa fasalka loo qoondeeyey 25 arday oo keliya, iyada oo dhinaca kalana loo diyaariyey deegaan iyo jawi ku habboon waxbarashada, iyo fasallada oo loo qalabeeeyey si waafaqsan halbeegga waxbarashada casriga ah. Waxa aanu qorshuhu yahay in fasallada dambe lagu soo kordhiyo Barashada culuumta Kombiyutarka.





@africanreliefco



Address: Barbera Road - Hargisa

Mobile: +252633278253

Phone: +252514333

E-Mail: somalia office1@gmail.com

Website: www.arcso.org

